MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

121 7th Place East, Suite 420, Metro Square Building
Saint Paul, Minnesota 55101

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhd

"Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo"

Kala noqoshada Siidaynta Ku meelgaarka ah Minn. Stat. §§ 253B.15 and 253B.18

1) Dadka daawanta loogu xukumay in ay yihiin shaqsiyaad halis ah maadaama oo ay qabaan cudurka dhimirka, in ay kiimiko ku tiirsanyihiin ama naafonimada korriinka

Dadka qaar ee daawayn lagu xukumay ayaa waxaa laga yaabaa in laga siidaayo xarunta daawaynta, barnaamijka daawaynta ee ay dowladu maamusho, ama barnaamijka daawaynta oo ku salaysan bulshada waxa loogu yeero siidayn ku meelgaar ah. Tani waxay u ogolaanaysaa shaqsiga in laga sii daayo xarun ama barnaamij, laakiin weli uu ku sii jiro xukunka daawaynta.

Marka shaqsiga la geliyo siidayn ku meel gaarka ah, xarunta ama barnaamijku waa inay abuuraan qorshe qoran oo sheegaya waxa shakhsigu u baahanyahay inuu sameeyo si looga fogaado in lagu celiyo xarunta oo ay la socdaan adeegyada loo fidinayaa. Qorshahan waa in la sameeyo iyadoo shaqsiga lagala tashanayo. Qorshuhu waa inuu sidoo kale sheegaa marka ka bixitaanka ku meel gaarka ahi dhammaanayo iyo waxa u sababi kara in degmadu ka noqoto bixitaanka ku meel gaarka ah. Nuqul waa in la siiyo bukaanka, qareenka bukaanka iyo adeegyada bulshada ee degmada.

Xaashidan xaqiiqdu waxay ka hadlaysaa hanaanka ka noqoshada ka bixitaanka ku meel gaarka ah.

A. Sababaha Kala noqoshada

Siidayna ku meel gaarka ah waa laga noqon karaa keliya haddii ay tahay beddelaad ugu xanibaada yar oo ay midkood ka mid ah:

1) Shakhsigu in uu jebiyey shuruudaha shayga ah ee sii deynta ku meel gaarka ah jabintaas oo abuuraysa in loo baahdo qofka inuu ku laabto goob xaddidan ama adeegyo bulsho oo aad u adag ama
2) Waxaa jirta halis suurtagal ah oo badbaadada qofka ama dadka kale ay khatar ugu jiraan taas;
   a) baahida qofka ee cunto, dhar, hoy ama daryeel caafimaad aan hadda loo haynin ama loo helaynin mustaqbalka dhow, ama
   b) shaqsigu wuxuu isku dayay ama ku hanjabay inuu si halis ah jir ahaan u waxyeeleynayo naftiisa ama dadka kale.

B. Habka Looga Noqdo Bixintaanka Ku Meel Gaarka ah

Waxaa jira laba habraac oo kala duwan oo looga noqon karo bixitaanka ku meel gaarka ah. Mid waxaa la adeegsadaa marka qofku ku xadgudbay shuruudaha siidaynta ku meelgaarka ah laakiin uusan muujin khatar ku wajahan naftiisa ama dadka kale. Midda kale waxaa loo isticmaalaa marka qofku muujiyo khatar ku aadan naftiisa ama dadka kale aan ka ahayn haddii aan isaga/iyada dib loogu celinin xarunta daaweynta ama barnaamijka.

Labada habraacba waxaa bilawda degmada iyadoo siinaysa ama u diraysa ogaysiis qoraal ah oo ujeedadiisu yahay ka noqoshada siideynta ku meelgaarka ah,shakhsiga, qareenka shakhsiga, xarunta ama barnaamijka shaqsiyan si ku meelgaar ah looga sii daayey, iyo bixiyaha adeegyada bulshada ee hadda jira.

Ogaysiisku waa inuu sheego sababaha keenay in ay degmadu ka noqoto siideynta ku meelgaarka ah. Sidoo kale waa inay u sheegtaa qofka xuquuqdiisa ama xuquuqdeeda.

Haddii aad hesho ogaysiis, la xiriir qareenkaaga isla markiiba haddii aadan ku raacsanayn ujeedada ah in laga noqdo siideynta ku meelgaarka ah. U sheeg qareenkaaga sababta aad u dareemayso inaadan ku xadgudbin siideynta ku meelgaarka ah. Haddii aad dareemayso in dad kale aysan kaa caawinin buuxinta shuruudaha qodobada qorshahaaga, la socodsii qareenkaaga.

Xaaladaha shakhsigu uusan khatar ku ahayn naftiisa ama dadka kale:

Degmadu waa inay maxkamada u dirto nuqulka ogaysiiska 48 saacadood gudahood. Degmadu waa inay sidoo kale u gudbiso warbixin maxkamada oo ay ku jiraan xaqiiqooyin cayiman oo taageeraya kala noqoshada, oo ay muujiso inay tani tahay fursada ugu xaddidada yar ee la heli karo, iyo waxay ay yihiin dadaalada cayiman ee la sameeyay si looga maarmo la noqoshada. Warbixintan waa inay kujiraan markhaati kasta, taariikhda uu dhacay xadgudubka la sheegay, iyo meelaha ay ka dhaceen.

Qofka iyo qareenkiisa ayaa waxay codsan karaan in maxkamadu ay dib u eegis ku samayso ka noqoshada la damacsanaa. Si tan loo sameeyo, qareenku waa inuu xareeyo markhaati furka sheegaya sababta ka noqoshada loo diidan yahay oo uu xareeyo codsiga dacwad dhageysi Tan waa in la sameeyo shan (5) maalmood gudahood marka la helo ogaysiiska.

Haddii maxkamadu ay ogaato inay jirto arrin dhab ah oo ka soo horjeedda ka noqoshada, waa inay dhagaysi ku qabtaan saddex (3) maalmood gudahood. Maxkamadu waxay sii wadi kartaa dhagaysiga illaa shan (5) maalmood oo dheeraad ah haddii ay jirto sabab wanaagsani. Dhagaysigan waa in laqabto kahor inta aan qofka lagu celinin goobta daawaynta. Degmadu waa inay tusto maxkamada inuu shaqsigu ku xadgudbay sii deynta ku meelgaarka ah.

Maxkamadu waa inay taageerto kala noqoshada haddii ay ogaato in:

1) Shakhsigu uu jebiyey shuruudaha shayga ah ee sii deynta ku meel gaarka ah taas oo abuuraysa in loo baahdo qofka inuu ku laabto goob xaddidan ama adeegyo bulsho oo aad u adag, ama
2) in ay jirta khatar suurtagal ah oo waxyeelo soo gaari karto qofka ama dadka kale haddii siideynta ku meelgaarka ah aan laga noqon, iyo
3) in kala noqoshadu ay tahay fursada ugu xaddidaada yar.

Haddii xaqiiqooyinku aysan taageerin baahi in loo qabo ka noqoshada, maxkamada ayaa ku celin doonta shaqsiga siidaynta ku meelgaarka ah.

Haddii qareenka iyo shaqsiga aysan xaraynin codsiga iyo markhaati furka, ama, maxkamadu ay ogaato inaysan jirin arin dhab ah oo jirta, maxkamada waxaa laga yaabaa, dhagaysi la'aan, in ay amarto shaqsiga in lagu celiyo xarunta ama barnaamijka.

Xaaladaha marka qofku u muujiyo khatar ku wajahan naftiisa ama dadka kale:

Degmadu waxay ka codsan kartaa maxkamada amar ah inay si dhakhso leh ugu celiso shakhsiga xarunta daawaynta ama barnaamijka inta ka horraysa dhagaysiga haddii ay jirto suurogalnimo weyn in nabadgelyada qofka ama dadka kale ay khatar galayso haddii aan isla markiiba loo soo celinin sababo la xiriira:

1) baahida qofka ee cunto, dhar, hoy ama daryeel caafimaad aan loo haynin ama loo helaynin mustaqbalka dhow, ama
2) shaqsigu wuxuu isku dayay ama ku hanjabay inuu si halis ah u waxyeeleynayo naftiisa ama dadka kale.

Haddii ay maxkamadu amarto qofka si deg deg ah in dib loogu celiyo xarun, shakhsiga iyo qareenkiisa/qareenkeeda ayaa waxay haystaan 14 maalmood in ay ku xareeyaan markhaati furka iyo codsi ay kaga soo horjeedaan kala noqoshada maxkamada. Nidaamka wax kasta oo kale waa la mid sida kor ku xusan.

2) Dadka daawanta loogu xukumay in ay yihiin shaqsiyaad qaba cudurka dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha.

A. Habka Ka Noqoshada

Madaxa xarunta daawaynta ama barnaamijka dawladeed ee dawladu maamusho ee shakhsiga sida ku meel gaarka ah looga siidaayay ayaa ka noqon karta siidaynta ku meelgaarka ah haddii mid ka mid ah kuwan soo socdaa ay dhacaan:

1) shaqsigu muuna raacin shuruudaha ku xusan qorshaha siidaynta ku meel gaarka ah,
2) shakhsigu wuxuu muujinayaa calaamadaha cudurka dhimirka oo u baahan kara qiimeynta cusbitaalka ama daaweyn, ama
3) shaqsigu wuxuu soo muujinayaa habdhaqan halis ku ah naftiisa ama dadka kale.

Kala noqoshada waxaa bilaabaysa xarunta daawaynta ama barnaamijka oo bixinaya ogaysiinta ujeedka ah in lala noqonayo siidaynta ku meelgaarka ah ee bukaanka. Ogaysiiskan waa in sidoo kale loo geeyo qareenka bukaanka iyo hay'ada adeega aadanaha ee degmada.

Ogaysiiskani waa inuu sheegayo sababaha ay xarunta daaweynta ama barnaamijku ugu talinayaan inay laga noqdo siidaynta ku meelgaarka ah. Waa inay ku jiraan xaqiiqooyin cayiman ee u baahan ka noqoshada oo ay una sheegto qofka xuquuqdiisa ama xuquuqdeeda.

Marka lagu jiro xaaladaha aan degdega ahayn, kahor inta aan laga noqonin siidaynta ku meelgaarka ah, madaxa xarunta daawaynta ama barnaamijka waa inuu ka helo warbixin hay'ada adeega aadanaha ee degmada oo qeexaysa sababaha loo codsanayo kala noqoshada. Warbixinta waa inay kujiraan xaqiiqooyinka codsigu ku salaysanyahay.

Xaalada degdega ah marka ay jiraan, madaxa xarunta ama barnaamijku wuxuu ka noqon karaa siidaynta ku meelgaarka ah iyada oo aan marka hore la siinin ogaysiis. Xaaladdan oo kale, warbixinta diiwaangelinta sababaha ee adeegyada aadanaha ee degmada waa in loogu gudbiyo xarunta daawaynta ama barnaamijka muddo toddoba (7) maalmood gudahood ah laga bilaabo marka uu qofku soo noqday. Xaalada degdega ahi badanaa waxay ku salaysantahay shakhsi loo arko inuu halis ku yahay naftiisa ama cid kale. Madaxa xarunta ama barnaamijka ayaa, hadal ahaan ama qoraal ahaan ku amri kara in shaqsiga isla markiiba lagu celiyo xarunta daaweynta ama barnaamijka.

B. Ku noqoshada xarunta ama barnaamijka

Ka noqoshada kadib, madaxa xarunta daawaynta ama barnaamijka ayaa laga yaabaa inuu ka codsado shaqsiga inuu ku soo laabto si ikhtiyaari ah ama uu u codsado sarkaal caafimaad ama nabadeed inuu shaqsiga soo celiyo.

Haddii ku soo noqosho ikhtiyaari ah aan la qorshaynin, madaxa xarunta daaweynta ama barnaamijku waa inuu ogaysiiyaa maxkamada xukunka daawaynta bixiisay. Maxkamadu waa inay amarto in sarkaalka caafimaadka ama nabada ee degmada shaqsigu ku sugan yahay in lagu celiyo shaqsiga goobta daawaynta ama barnaamijka ama xarun kale oo daawayn ama barnaamij diyaar u ah inuu qaabilo qofka.

C. Racfaanka ka noqoshada

Shaqsi kasta oo lagala noqday siidaynta ku meelgaarka ah, ama qof kasta oo danaynaya, ayaa wuxuu ka codsan karaa Guddiga Dib u eegista Gaarka ah in ay dib u eegis ku sameeyaan ka noqoshada. Codsiga waa in lagu xareeyo toddoba (7) maalmood gudahood, oo aysan ku jirin Sabtida, Axadda iyo feestooyinka sharciga ah. Dhagaysiga waa in ballantiisa la qabto 30 maalmood gudahood.

Guddiga Dib u eegista Gaarka ah waa in ay kula taliyaan gudoomiyaha Adeegyada Aadanaha haddii ay tahay in kala noqoshada loo hoggaansamayo iyo in kale. Tan waxaa ku jiri kara talo soo jeedinta siideyn ku meelgaar ah oo cusub. Gudoomiyaha) ayaa sameeya go'aanka ugu dambeeya.

Shaqaalaha xarunta daawayntu waa inay ka caawiyaan bukaanka codsashada dhagaysiga Guddiga Dib u eegista Gaarka ah.

D. Dib u aqbalid/soo jiifin Ikhtiyaari ah

Qofka loogu xukmiyey daawaynta in inuu yahay qof qaba xanuunka dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha oo ku jira siidayn ku meelgaar ah ayaa si iskii ah ugu laaban kara xarunta daawaynta ama barnaamijka isaga oo haysta ogolaanshaha madaxa xarunta ama barnaamijka.

Soo celintu waxay noqon kartaa ilaa 30 maalmood ama, haddii hay'ada adeega aadanaha ee degmadu ogolaato, waxay noqon kartaa illaa 60 maalmood. Xaaladdan oo kale, siideynta ku-meelgaarka ah ayaa sii soconaysa.

Haddii shaqsiga aan dib loogu soo celin siidaynta ku meel gaarka ah 60 maalmood gudahood, siidaynta ku meelgaarka ahi way burburtay Haddii ay taasi dhacdo, shakhsigu wuxuu haystaa 15 maalmood inuu kaga codsado dib u eegista ka noqoshada Guddiga Dib u eegista Gaarka ah.

Dhammaan xeerarka iyo shuruudaha siidaynta ku meelgaarka ahi way shaqaynayaan haddii shaqsiga laga siidaayo xarunta daawaynta ama barnaamijka muddo 60 maalmood gudahood ah. Guddiga Dib u eegista Gaarka ahi waxay u baahanyihiin oo keliya inay dib u eegaan tan haddii uu isbeddel weyn uu ku yimaado qorshaha sida isbeddelka meesha deganaanshaha

---

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada ama haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.